

Mashruuca Horumarinta Badbaadada

Dadka Wadada Ku Lugaynaya iyo

Xasillinta Taraafikada

16th Avenue SW laga bilaabo SW 100th Street ilaa SW 107th Street



King County

Local Services

Road Services Division


Guudmarka mashruuca

Mashruucani wuxuu ka dhigi doonaa mid badbaado u leh in dadku ku lugeeyaan, baaskiil ku kaxeeyaan, ama gaari ku safraan wadada 16th Avenue SW inta u dhaxaysa SW 100th Street iyo SW 107th Street ee White Center.

Hormarinada lagu samaynayo

waddooyinka waxay noqon doonaan:


- Xariiqan u samayn si loo abuuro haadad ay baabuurto ugu socon karaan labada jiho.
- Haad loo qoondeeyay baaskiilada oo ballac ahaan shan fiit ah oo labada dhinacba ka leh laba fiit oo dhul bannaan oo dheeraad ah (aagga kala badbaadista)
- Nalal biligleynaya iyo calamadaha meelaha ay wadada kaga gudbaan dadka lugeynaya oo lagu dhejiyo isgoysyada aan lahayn calamadaha taraafikada.
- Haadka leexashada oo wadada bartankeeda ah kaas oo u ogolaanaya in ay gawaaridu si xor ah ugu socdaan haadka wayn ee safarka.



Jidka hadda jira - ma lahan haad baaskiil, dhinacyada waddooyinka oo la ballaariyay, ama nalalka badbaadada.

Baarkinka wadada ayaa isbedeli doona

Goobaha baarkinka ee wadada 16th Ave. SW inta u dhaxaysa waddooyinka SW 100th iyo SW 107th waxaa loo bedeli doonaa 34 goobood oo baarkin ah kadib marka lagu sameeyo dhammaan casriyaynta.



Meesha lagu calaamadeeyay midabka casaanka ayaa ah aagga dhismaha ugu weyn ee mashruucan.

Waa maxay sababta aanu mashruucan u samaynayno:

Mashruucani wuxuu meel go'an u abuuri doonaa dhammaan isticmaalayaasha. Waxaa dhacay dhowr shilal oo ay ku lug lahaayeen dadka ku lugeynaya waddooyinka. Horumarinta badbaadada ayaa loo baahan yahay.

Daraasaduhu waxay muujinayaan in horumarinada sida kuwa ku jira mashruucan ay ilaa saddex meelood meel yareyn karaan tirada isku dhaca/shilalka ku lugta leh dadka ku lugeynaya waddooyinka iyo baabuurta.

Jadwalka:

- Dhismuhu wuxuu bilaabmayaa; Gu'ga/Xagaaga 2025
- Mashruucu wuxuu dhamaanayaa: Jiilaalka 2025

Nagala soo xiriir:

Broch Bender, Communications

(206) 263-1189

limaylka: bbender@kingcounty.gov



Websaydka mashruuca:

Kingcounty.gov/16thAveSW

Mashruuca Horumarinta Badbaadada Dadka Wadada Ku Lugaynaya iyo Xasillinta Taraafikada


16th Avenue SW laga bilaabo SW 100th Street ilaa SW 107th Street



King County

Local Services

Road Services Division



Naqshad cusub oo waddada ah – haadad loo qoondeeyay baaskiilada, ballaarinta dhinacyada laamiga, haad loogu talagalay leexashada gawaarida, iyo meelaha laga gooyo waddooyinka oo si si qurux badan loo calaamadeeyo.

Title VI: Waa siyaasadda degmada King County in la xaqiijiyo in qofna, iyadoo lagu salaynayo isir, midab ama asal qaran, sida uu dhigayo Title VI ee Xeerka Xuquuqda Madaniga ah ee 1964, aan laga saari karin ka-qaybqaadashada, loona diidi karin gunnooyinka, ama sinaba aan lagu takoori karin mid ka mid ah barnaamijyadeeda iyo waxqabadyada ay dowlada federaalku maalgeliso. Qof kasta oo aaminsan in la jebiyey ilaalinta Title VI, wuxuu cabasho u gudbin karaa Degmada King County, fadlan Lydia Reynolds-Jones kala xiriiir 206-477-8100.

ADA: Macluumaadka waxaa lagu bixin karaa luqad midaan ka duwan ee dadka aan ku hadlin luuqadda Ingiriisiga ama waxaa lagu bixin karaa qaabab kale sida far waaweyn, farta indhoolayaasha, ama cod maqal ah oo loogu talagalay dadka naafada ah. Fadlan Adeegyada Wadooyinka ka wac 206-477-8100. Dadka dhegaha la'a ama maqalka ku culus waxay nagala soo xiriiri karaan Adeegga Gudbinta Washington (Washington Relay Service) oo ah 7-1-1.